



Federal Republic of Somalia
Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management
The National Multi-Hazard Early Warning Center

WARBIXINTA FATAHAADA DEEGANADA GOBOLKA SH/HOOSE

MUQDISHO, Soomaaliya, Sabti, 19^{KA} July 2020: Degmada Afgooye ee Gobolka Shabeelada Hoose iyo deeganada hoos yimaada waxaa ku fatahay Wabiga Shabeele kaas oo saameeyn xoogan ku yeeshay Dad gaaraya **300** qoys oo ku nool Degmadda xaafadaheeda sida Dhagaxtuur, Baalguri, Dooylaaw iyo Beerta Imaaraadka.

Sidoo kale qaar kamid ah tuulooyinka hoos yimaada degmada Afgooye **sida Tuulooyinka** Irdoole, Balbaley, Balow, Jambaluul, Mareeray, Sabiib iyo Caanoole, ayaa waxaa ka barakacay qoysas gaaraya **1500** oo Qooyo. Sidoo kale waxa jira deegaano kale oo ka tirsan gobolka shabeelada hoose gaar ahaan deegaanada ku teedsan Deegaanka Janaale kuwaas oo laga cabsi qabo in ay fataahad ka dhalato walow saameen u geeysatay roobka xagaaga ee hada da'aya.

Deegaanka Janaale ayaa isagana kamid ah meelaha laga cabsi qabo inuu wabigu ku soo fatahu , in kastoo ay jiraan xaafaddo kamid ah deegaanka Janaale , Sida Xaafad Siimow iyo Xaafad Jadiid oo ay soo galeen biyo ka dhashay roobkii Xagaaga.

Waxaa kaloo jira tuulooyin ay saameysay Fatahaad uu sababay roobkii xagaaga iyo wabiga shabeelle oo heerkiisu sare u kacay qooyas gaaraya **291** Qoys u soo barakacay Deegaanka Janaale. Intaa waxaa sii dheer tuulooyiin laga cabsi qabo inay wax yeelo kasoo gaaraan fatahaada iyo Daadadka, waxaa kamid ah Tuulooyinka, Dagwariiri, Cadiimoole, Awdheegle, Waagaadi iyo Mishaani.

Saameynta Fatahaadda

1. Fatahaada ayaa sameen balaaran oo ay ku yeelatay dalagii beeraha
2. Waxaa guryahoodii ka hayaamay oo ka barakacay dad gaaraya **2,091** qoys oo ay saameysay Fatahaada dadkaas oo u baahan Hooy, Cunto, Biyo Nadiif iyo Caafimaad.
3. Sidoo kale fatahaada ayaa saameyn balaaran ku yeelatay isa socodka Gaadiidka dadweynaha iyo Ganacsiga Deegaanada ay saameysay Fatahaada.

Gobolka shabeeladda hoose Waxaa mara Wabiga Shabeele Kaas oo ay ku tiirsanyihiin Dadka iyo Duunyadda. Xiliyadda Gu'ga iyo Deyrta ayaa marwaliba saameyn Ku yeesha Deegaanada ku teedsan Wabiga shabeele, deegaanadaas ayaa inta badan fatahaada wabiga saameysaa, Dadka dagan Gobolka aan kor kusoo xusnay ayaa inta badan ku tiirsan tacabka beeraha.

Dhammaan dhinacyada ka shaqeeya ka jawaabidda xaaladaha noocan ah ee isugu jira hey'adaha dowliga ah iyo kuwa gaarka ah ee ka shaqeeya arrimaha gargaarka ayaa laga codsanayaa in ay sida ugu dhaqsiiyaha badan u gargaaraan dadka u baahan gargaarka ee ay fatahaadahani saameeyeen.

Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiiibooyinka waxey si dhaw ula socotaa xaaladda fatahaadda waxeyna idiin soo gudbineysaa waxa soo kordha iyo sida ay isu baddesho xaaladda.

DHAMMAAD

Si aad Macluumad dheeraad ah u hesho, fadlan la xiriir: Ahmed Omar, Madaxa Xiriirka iyo Xogaha guud, communications@mohadm.gov.so, Tel. +252 615578678.